



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay:

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Maarso 8, 2021

Ku socota: Daneeyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Bisha Wacyi gelinta DD ee 2021

Hal sano ayaa laga joogaa tan iyo markii kiiskii ugu horreeyay ee COVID-19 laga ogaaday Oregon ee Amarka Fulineed ee Guddoomiyaha gobolka la soo saaray, kaasi oo beddelay nolosha oo dhan.

Maarso sidoo kale waa [Bisha Wacyi gelinta Naafanimada Korriinka](#), oo ah wakhti kor loo qaado wacyi gelinta ku saabsan ka mid noqoshada dadka qaba naafanimada maskaxda iyo korriinka (I/DD) ee dhammaan dhinacyada nolosha bulshada, iyo sidoo kale wacyi gelinta caqabadaha ay dadka naafada ahi ay wali mararka qaarkood la kulmaan.

COVID-19 ayaa keenay baahida loo qabo in wacyi gelintani ay safka hore soo gasho. Waxaa caddaatay in dadka qaba I/DD ay la kulmaan haliso sare haddii ay qaadaan fayraska, dadka u dooda naftooda, qoysaska, iyo daryeel bixiyayaasha iyo hay'adaha maamulka kiiska ayaa dagaal u galay in codkooda la maqlo. Bulshada I/DD oo dhan ayaa isku timid si ay ugu dagaalamayaan xuquuqahooda dhanka caafimaadka, oo ay ku jiraan yeelashada shaqaalaha taageerada oo jooga isbitaalka iyo xaqiijinta in ay heli karaan marka tallaalka uu jiray. Waxaanu sidoo kale ka shaqeynay in ay jirtay ilaalin sax ah si dadka loogu ilaaliyo guryahooda iyo bulshadooda dhexdiisa.

Kani wuxuu ahaa sanad adag, iyada qaarkood ay saaxiibo iyo qoys ay ku waayeen cudurkan baahsan aad aadka u daran. Dhammaanteen waxaan la kulanay caqabadaha go'doonsanaan korodhay iyo la qabsiga waxyaabo

badan oo lagu qabanayo dhanka shaashadaha halkii si fool-ka-fool loo sameyn lahaa. Waxaan sidoo kale yeelanay dabka kaymaha, meelaha qaarkoodna, roob baraf wata si wax looga qabto. Dadka qaba I/DD, qoysaskooda iyo daryeel bixiyayaashooda ayay sidoo kale soo food saartay arrimo cunsuriyadeed iyo cunsuriyad nidaamsan iyo halgan socda oo loogu jiro cadaaladda bulshada iyo sinnaanta.

Caqabadahani oo dhani waxay sidoo kale muujiyeen sida uu adkeysiga wanaagsan iyo awooda badan ee bulshadani tahay marka aan dhammeenteen wada shaqeyno. Hay'adaha maamulka kiiska ayaa dhaqso ugu dhaqaaqay adeegyada meesha fog laga qabto iyo in ay gacan ka geystaan qaadashada Qorshayaasha Taageerada Shakhsi si loo xaqiijiyo in dadku weli buuxinayaan hadafkooda. Daryeel bixiyayaasha ayaa la yimid siyaabo hal-abuur leh si dadka looga dhigo kuwo isku xiran, iyo abaabulka xafladaha qoob-ka-ciyaarka ee Zoom, booqashooyinka iyada oo gawaarida lagu dhex jiro la isa salaamayo 'drive-by visits' iyo ka caawinta dadka in ay qaataan fasallo dhanka internet-ka ah.

Dadka qaba I/DD iyo xubnaha ka tirsan qoyska ayaa muujiyay awoodooda iyo go'aan qaadashadooda inkasta oo uu jiro cudurkan baahsan. Dadka qaarkiis oo qaba I/DD ayaa bilaabay shaqada meesha fog laga qabanayo. Qaar kale ayaa is xilqaamay, oo kaarar u sameynayay dadka ku jira guryaha dadka lagu xannaaneeyo ama helay hiwaayado cusub oo ay si ammaan ah u qaban karaan. Dad badan oo qaba I/DD iyo xubnaha ka tirsan qoysaskooda ayaa u dooday caafimaadkooda iyo badbaadadooda. Bulshada I/DD ayaa lagu xujeeyay caqabad weyn iyaga oo markale, muujiyay sida aan u awood u leenahay marka aan wada shaqeyno.

Nuxurka awoodaasi, [Guddiga Naafanimada Korriinka ee Oregon](#) ayaa bishaan marti gelinaysa olole sawir qaadiseed. Waxaan kugu marti qaadeynaa in aad dadka la wadaagto sawirrada iyo sheekooyinka adiga oo isticmaalaya astaanta hashtag #BetterTogether21. Waxaad sawirradaada iyo sheekooyinkaaga soo galin kartaa [boggooda Facebook](#) – xusuusnow in aad isticmaasho astaanta hashtag #BetterTogether21 si aad ugu xiranto. Waxaad sidoo kale sawirrada email ugu diri kartaa ryley.newport@ocdd.org.

Marnaba Bisha Wacyi gelinta Naafanimada Korriinka sidan oo kale macno weyn uma yeelan. Waxaan ku qab weynahay oo sharaf ii ah in aad qayb ka noqdo bulshadan wanaagsan.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ayaa laga heli karaa
[http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-
DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx](http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx)

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo
[*wax ka ogow website-keena.*](#)

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriiir 503-945-5811. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.